

Sida aad noola
soo xiriiri kartid:

Teleefoon: 612-627-0160

www.youthcommunityconnections.org

May 2008



MessageBRIEF

Youth Community Connections
Minnesota's Statewide Afterschool Alliance

Geediga Yaabka leh ee Qaangaarnimada

Maxaa socda run ahaantii?

Si aan u fahano horukaca dhalinyarada hadda waxaan haynaa baaritan cilmiyeed la xiriira habka ay u korto maskaxda dhallinyarada qaangaarku. Waxaan ogaanay in da'yartu ay dhammeystiranto korriimadooda jireed inta u dhaxeysa 10 jir illaa 15 jir. Isla markaasna ay sii socoto isbeddellada xagga maskaxdoodu ee qaabeeya kartida ay wax ku sababeeyaan, ku xalliyaan mashaakillada, isla markaana ay ku fahmaan natiijada hab dhaqankooda ee sanadaha ugu dambeeya qaangaarnimadooda iyo sanadaha ugu horreeya 20 jirnamadooda. Xiriiro muhiim ah ayaa sameysma noloshooda dhammaan inta ay ku guda jiraan 10 jir illaa 20 jir ama ay ka hanaqaadayaan kuwaaas oo saameyn ku yeesha bulshanimadooda, dareenkooda iyo garaadkoodaba.

Inta ay isbeddeladan oo dhan ku socdaan maskaxdooda, dhalinyaradu waxay u baahanyihiin waaya aragnimo dhab ah oo ku jiheysa waddada toosan. Waxaan fursad u haysannaa Inaan u jiheynto dhallinta dhinaca wax soo saarka, hanaqaad guul wata---- waana naqaanna sida aan u sameyn lahayn arrintaas.

BULSHO KU BARBAARINTO WAXAY CAAWISA HABSAMI U KOBICINTA MASKAXDA

Waaya aragnimada ugu fiican ee loo horumarin karo maskaxda waxay tahay mid ku saleysan Bulshada, halkaso dhallintu la dhaqmaan dad kala duwan kuna sahaniyaan adduunka.

Mashaariicda ku saleysan bulshada dhexdeeda waxay siiyaan dhalliinyarada fursado ay ku bartaan xallinta mashaakillada iyo go'aan qaadashada wanaagsan ayadoo ay hagayaan Dad waxgarad ah.

Kuwaan oo dhan xaqiiqdii waa waaya-aragnimada ay maskaxda dhalinta soo koreysaahi u baahan tahay si ay u bartaan go'aan-qaadasho sax ah isla markaana ku dhistaan astaan bulsho caafimaan qabta.

Sanad walba, ruuxa dhallinyarada ah ee ku nool Minnesota wuxuu heli karaa 2000 saacadood oo ka baxsan wakhtiga dugsiyaga waxbarashada. Wakhtigaan wuxuu u dhigmaa celcelis ahaan ruux haysta shaqo joogta ah sannadkii oo dhan. Sidaa darted, waa inaan dhalliinyarada ku caawinna sida ay ugu faa'ideysan lahaayeen wakhtigaas.

WEY U AAYNAYAAN SAAMEYNTA TOOSAN WALIGOOD

Marar badan waxaa la ogaaday ka-qaybgalka mashaariicda dugsiga-dabadoo (afterschool) Iyo kuwa ku saleysan mujtamaca dhexdiisa inta aan la joogin dugsiyada inay u horseedaan dhalliinta sii wadashada waxbarashadooda, buundooyin fiican inay kaga aflaxaan dusiyadooda, Habdhaqan shaqo fiican yeeshaan, iyo xiriir fiican ee dhexdooda ay ka helan meeshaan.

Waxaan ogaanay saameynta hagaagsan oo ay ku yeeshaan dhalliinyarada mashaariicda horumarintu. Haddey noqon lahayd ka heesidda masraxyada, ama dhir ku beeridda xaafadahooda, ama caawinta dhallaanka yar-yar, ama farbaridda carruurta--- ku waan oo dhan waxay dhisaan kalsoonida dhalliinyarada, waxeyna ogaadaan waxyaabaha wanaagsan ee ay qaban karaan.

Laakiin waxaan ogeyn waa sida waaya-aragnimada noocan ihi u saameyso maskaxdooda. Uga dambeyntii, fikradaha sida "waan la shaqeynkaraa dadka kale", "Waan xallin karaa mushkilladaan" waxay noqdaan kuwa dabiici ahaan ugu noqda dhallinta. Dhalinta ka qayqaadata mashaariicdaan, waxay noqdan kuwo xilkas ah una abaalguda bulshadooda kana qaybqaata horumarinta isla markaana ixtirama dadkooda.

Culumta Sayniska ayaa naga caawiyay inaan fahamno dhalliinta maskaxdoodu sida ay u hormarto, taasi waxay fursad nopo siisay sida maskaxda dhallinyarada u sameysanto siyaabo waxtar u leh naftooda.

Inta aan ka ognahay noocyada waaya-aragnimada leh ee maskaxda dhalliinyarada u hormarto, wax mar-marsiiya ah uma heli karno inaan ugu faa'ideeyn weyno dhalliinyarada Minnesota inay ka faa'ideystaan fursadahaan.

*Aan ku kaalmeyno dhalliinyarada
anagoo siineyna waayo-aragnimo
leh aqoon sax ah*